


# In la geliyo ama in aan la gelin?

'In la geliyo ama in aan la gelin' waa wadiiqo caddeyn ku saleysan oo u qasdeysa inay hagaajiso ogaanshaha iyo maareynta Caabuqa Goobta Kaadida (UTI) ee dadka waaweyn ee ku nool guryaha xannaanada dadka waaweyn. Dariiqadaan waxay muujisay inay yareysay isticmaalka antibiyootiga iyo isbitaal u dhigida UTI. Warqadaan waxay sharxaysaa wax badan oo ku saabsan UTIs iyo 'In la geliyo ama in aan la gelin' dariiqada daryeelka.

## Kaadida leh bakteeriyyada ee dadka da'da



Kaadida dadka da'da ah ee bakteeriyyada leh micnaheedu ma aha inuu jiro caabuq u baahan antibiyootig. Bakteeriyyadu waxay si dhib la'aan ah ugu noolaan kartaa kaadida dadka waaweyn. Xaqiiqdii, qiyaastii boqolkiiiba 50 dadka da'da ah kaadidoodu waxay leedahay bakteeriya iyadoon wax astaamo ah lahayn. Kuwa leh marin kaadiyed oo wakhti dheer, tani waxay kor u qaadaa ilaa boqolkiiiba 100.

## Waa maxay dhibka usha cabirka kaadida?

Ulahe cabirka kaadida waxaa badanaa loo isticmaalaa in lagu ogaado UTI dadka waaweyn ee ku nool guryaha daryeelka. Natijjo laga helay ee nitrite' (bakteeriya sameeyaha) ama 'leucocyte' (unugyada dhiiga cad sameeyaha) waxaa laga yaabaa raadin caadi ah sababtoo ah ee qadarka sare ee dadka da'da ah ee ku leh bakteeriya kaadida. Badanaa, haddii degene uu leeyahay natijjada usha cabirka kaadida mana laha



astaamo khaas ah, sida dhicitaan ama xurdaysanaan, waxaa si khaldan loogu sheegay inay qabaan UTI. Ogaashaha dhabta ah waxaa laga yaabaa in la waayo deganuhuna waxaa laga yaabaa inuu u qaato antibiyootiga si aan loo baahneyn.

Waxaa laga isticmaalay NHS Nottinghamshire County Council'Mashruuca 'Dariiqada caddeynku saleysan iyo Shaqada Dhaktar Annie Joseph. 'Dariiqada caddeynku saleysan' waxaa si guul leh u isticmaalay Mashruuca Hagaajinta Tayada NHS ee guryaha daryeelka ee England.

Daabacadii 2 (Maarso 2022)



Australian Government

Aged Care Quality and Safety Commission

## Antibiyootiga:Dhib ka badan wanaagooda?

Antibiyootigu waa daawo qiimo leh oo awood badan. Bakteeriyyadu waxay u adkeysan kartaa antibiyootiga. Tan micnaheedu waxaa weeye in antibiyootigu uusan shaqeyn marka qofku uu dhab ahaan ugu baahan yahay u adkeysanigan bakteeriyyada waxay ugu fidhi kartaa si aad u sahlan degaanka guryaha dadka da'dada lagu daryeelo. Waxyeelo sida lalabo, caloosha oo ku kacda iyo finanka maqaarka korkooda ah waa wax caadi in lagu arko dadka da'da ah ee qaata antibiyootiga. Caabuqa naf goyska ah oo loogu yeero shubanka C.difficile (ama 'C. diff') waxaa keeni kara antibiyootiga. Qof kasta waxaa saran masuuliyada ilaalinta antibiyootiga waana in loo isticmaalaa oo kaliya markii ay jirto caddeyn adag oo ah caabuqa bakteeriyyada.



## Waa dariiqo shaybaar oo caddeyn leh



Shaqaalaha guryaha dadka da'da lagu daryeelo waxay isticmaalaan dariiqo shaybaar caafimaad oo ku saleysan tilmaamaha wax loo sameeyo ee ugu wanaagsan. Ulahe kaadida lagu baaro lama isticmaalo marka ugu horeysaba. Bedelkood shaqaaluhu waxay isticmaalaan dariiqo shaybaar caafimaad si ay xoogga u saaraan qiimeyeenta astaamaha iyo calaamadaha sheegaya UTI ama sababo kale, iyo talaabooyinkii ay qaadi lahaayeen. Haddii UTI laga shakiyo qaadida kaadida si loo baaro aad ayey muhiim u tahay si ay loo ogolaado ku daaweynta antibiyootiga ugu wanaagsan uguna fican.

**Wixii Su'aalo ah?** La xiriir maareeyahaaga ama Hogaanka IPC.

**Ma dooneysaa inaad ogaatid wax intaas ka sii badan?** gal [agedcarequality.gov.au/antimicrobial-stewardship](http://agedcarequality.gov.au/antimicrobial-stewardship)



**Si ka sii fican  
u isticmaalida  
antibiyootiga**